

Xaq ayaad u leedahay inaad ku dareento amaan guriga



Queensland Government

Rabshada qoyska iyo guriga maaha wax la qabali karo Australia gudaheeda. Iyada oo aan ku xirnayn qofkaad tahay ama meeshaad ka timid, rabshada guriga iyo qoyska waxay waxyeelli kartaa qof kasta waxayna ka jirtaa bulshada dhexdeeda.

Haddii aad ku nooshahay xadgudub, ama aad ku dareemayso baqdin gurigaaga, maaha qalad aad leedahay. Uma baahnid inaad dareento ceeb ama waji gabax.

Cilaaqaad caafimaad qabaa waa is-aamin, kaalmayn iyo amaan. Maaha qof inuu cabsiiyo qof qoyska mid ah.

Waxaa la heli karaa caawimo. Haddii aadan dareemin amaan dhib maaha inaad raadsato caawimo. Markaad u baahan tahay kaalmo, la xiriir:

Xaalladaha degdegta ah (Booliis ama ambalansi)

Saddex Eber (000)

Haddii qof ku jiro khatar degdeg ah.

Khadka caawimada Dumarka (DVConnect) 1800 811 811

Talo qarsoodi ah oo lacag la'aana oo dumarka ay guriga ku haysato rabshad.

Adeega Kaalmada Dumarka Soogalootiga ah

07 3846 3490

Talasiinta iyo Talada dumarka ka soo jeeda dadka aan Ingiriiska afkoodu ahayn.

Khadka Caawimada ragga (DVConnect) 1800 600 636

Caawima qarsoodi ah ee ragga ay haysato xaallada qoys iyo kuwa cilaaqaad.

Lifeline

131 114

Kaalmo haddii ay ku haysato qalaalase shakhsiyeed waqti kasta habeen iyo maalin.



Interpreter

Si aad u hesho turjubaan afkaaga ku hadla wac

13 74 68.

Dhaqanku marna ma noqon karo sabab ay u dhacdo rabshad qoys ama guri.

www.qld.gov.au/domesticviolence

Rabshada guriga ama qoyska waxay dhacdaa marka qof cid cilaqaad la lihi isticmaalo awoodooda xakamaynta, xadgudubka ama cabsiinta qofka kale. Waxay qaadataa qaabab badan oo kala duwan kan guudna wuxuu ka dhacaa cilaqaadka qoyska iyo guriga.

Lamaanahaaga, xubin qoyska ka tirsan ama qof ku daryeelaya ma isticmaalay ama kugu handaday noocyada xadgudubka ah ee socda?

Xadgudub dhaqaale

- › Iyada oo lagaa qaado lacagta aad hesho ama aad xaqa ugu leedahay Centrelink?
- › laguma siin lacag kugu filan adiga ama baahida carruurtaada?
- › Lala socdo ama la kantaroollo waxaad gadato?
- › Lagaa hor istaago inaad shaqo hesho?

Xadgudub jireed

- › Ma lagu riixay, garaacay, cunaha ma lagu qabtay, ma lagu laaday waxse ma lagugu tuuray?
- › Ma lagaa joojiyey inaad hesho dhakhtar, cunto kugu filan ama biyoh?

Xadgudub galmo

- › Ma lagugu khasbay galmood aadan doonayn inaad samayso (guurka dhexdiisa)?
- › Ma lagugu handaday waxyeello haddii aadan galmoodka ogolayn?

Xadgudub afka ah

- › Ma Laguu dhaartay ama yiri hadalo aflagaado ah?
- › Ma lagu ihaanayey, dhaleecayey, khaasatan goob dadweyne?

Dhibaatayn shucuureed ama maskaxeed

- › Ma lagu dareensiiyey, yasad, ceebayn, dayicid, shidayn ama bajin?
- › Ma lagu handaday jir ahaan, adiga iyo carruurtaada ama marabidaada?
- › Ma lagaa qaaday baasaboorka ama lagu handaday in lagaa dhoofiyo Australia?
- › Ma lagugu handaday in lagaa tago ama carruurta lagaa qaado?
- › Ma la kantaroolay waxaad qaadata, daawato iyo/ama akhrido?

Xadgudub dhaqameed cibaado

- › Ma lagugu ceebeeyey dhaqankaaga ama cibaadadaada ama waxaad samayso?
- › Ma lagaa joojiyey isticmaalida luqadaad rabto iyo aadida munaasabadaha diineed ama dhaqan?
- › Ma la isticmaalaa arrima diimeed ama dhaqan si sabab looga dhigo waxyeelida ama kugu khasbida waxyaalla aadan samaynayn
- › Ma lagugu handaday in aadan bixin meherka?

Xadgudub bulsho

- › Ma la kantaroolaa meeshaad aado ama qofkaad aragto, guri ma lagugu xiray ama lagaa joojiyey inaad aragto qoyskaaga ama saaxiibadaa?
- › Ma lala socdaa ku hadlida telefoonkaaga iyo baraha bulshada (sida Facebook, Instagram)?
- › Ma masayraa, mase leeyahay dhaqan lahaansho haddaad la hadasho kuwa kale?

Haddii mid ka mid ah kuwaas ay kugu dhacayaan adiga, tani waa rabshad qoys iyo mid guri.